Minneapolis
City of Lakes

# Frey Welcomes State Action as Important Next Step

## *Frey ayaa sheegay in loo baahanyay taageerada gobolka si wax looga qabto caqabadaha hortaagan in isbedel lagu sameeyo booliska magaalada, sharciga gobolka iyo heshiiska-shaqo ee dalladda uruka bookiska isgaa soo dhawaynaya gacasaarka gobolka uu la yeeshay magaalada*

MINNEAPOIS – Duqa Minneapolis Jacob Frey ayaa ka hadlay soona dhaweeyay tallaabooyinka Golboka Minnesota:

"Si magaaladeena loo bogsiiyo, waxaan u baahanay inay George Floyd iyo reekiisuba helaan caddaalad iyo inaan ku dhaqaaqno isbedel macna leh oo lagu sameeyo sida Boolisku u howlgalo" ayuu yidhi Frey. " Sannado badan ayaa dalladda ururka booliska iyo sharciyo jira oo hortaagan in xubnaha ciidanka la horkeeno cadaalada ay caqabad ku ahaayeen isbedel dhab ah oo ay wadeen madaxda booliska iyo xildhibaanada magaalada. Waan soo dhawaynayaa arrinka maanta lagu dhawaaqay maxaayeelay burburinta caqabadaha raagay, bedelaada hannaanka boolis u shaqeeyo, iyo in wax laga qabto nidaamka cunsuriga ah ayaa u baahan in dhamaanteen aan si wadajir ah u shaqayno.

" Dhawrkii sanno ee u dambeeyey waxaanu tallaabooyin u qaadnay jihada saxda ah, waxaanan qirayaa wixii horumar ah een gaadhnay waxaa iska leh hoggaank maxaliga ah iyo dadk u dooda bulshada" Frey oo siiwada ayaa yidhi " Hase ahaatee, dadaaladii loogu jiray isbedelka waxa wiiqay nidaam caddaaladeed oo kala dhantaalan iyo heshiisyada dallada ururka booliska oo sharciya lagu daabacay.

**"**Talaabada gobolku waa mid wax ka taraysa burburinta caqabada isbedel ku samayta booliska, waana soo dhawaynayaa in Minneapolis ay la bahowdo gobolka."

Bishii Meey 2019, Minneapolis waxay noqotay magaaladii ugu horeysay ee joojisay isticmaalka tabarka dagaalyahanka, ma aha oo keliya marka ay askartu shaqada ku jirto ee waa xataa hadii ay shaqada ka bexeen.

Gugii 2018, Frey iyo taliye Medaria Arrandondo ayaa adkeeyay nidaamka u dhigan adeegsiga kaamaradaha iyadoo taasi keentay in lala xisaabtami karo askarigii aan raacin nidaamka. Ku dhaqanka adeegsiga kaamarada ayaa kor uga kacay 55% gaadhayna 95% markii uu Frey la wareegay xafiiska.

Bisha Abril 2019 – Kadib markii baadhitaan ay sameeyeen saxaafadda iyo xafiiska Xeer Ilaaliya Guud lagu ogaaday in aanay waaxyaha booliska ee gobolk Minnesota aanay si wanaagsan ugu adeegin daka kufsiga loo gaystay ayay Minneapolis noqotay magaaladii ugu horaysay ee gobolka Minnesota oo wax ka bedesha hannaanka loo dabagalo kufsiyada si loo garab istaago dhibanayaasha soo dacawooday.

2018-kii ayaa waaxda booliska Minneaplis waajib kaga dhigtay askari walba oo ciidanka ka tirsan tabararka loo yaqaanno "Eexda Qarsoon."

2016-ka ayaa isla waaxdaasi dib-u-eegis ku samaysay adeegsiga xooga askariga iyadoo ilaalinaysa qiimaha nafta, ballaadhisayna tabaha qaboojinta xaaladda, isla markaana aan taageerayn toogashada tooska ah iyo ta gaadhi socda – iyadoo isticmaalaysa erayada ugu adage ee sharciga ku banana.

Taliye Arradondo ayaa horyaal u ahaa shaqada waaxdan oo hirgelisay tabarrada ugu adag waddanka ee ku saabsan nidaamka caddaalada. Nidaamka Caddaalada ayaa waxaa laga dhigay qaybdhan o oleh unug dhan oo ka tirsan waaxda, 2017-kii.

2016-kii ayaa waaxdu waxay hirgelisay “Awoodda Joojinta Falxumada” taasoo waajib kaga dhigaysa askariga in uu joojiyo ama isku dayo inuu joojiyo askari kali marka uu si xad-kabax ah ama aan loo baahnayn u adeegsado awoodiisa.

Barnaamijka caafimaadka dhimirka oo bilowday bishii Mey 2017-ka, ayaa la ballaadhiyay si loogu daro 5 rugood oo boolisku leeyay labadii sanadood ee ugu dambaysay.

Minneapolis ayaa ka tirsan lix magaalo oo wadanka ka mid ah oo hirgeliyay tallaabooyin lagu kasbanayo kalsoonida dadwaynaha iyo cadaalad taasoo loogu talagalay in kor loogu qaado nidaamka caddaalada, hoosna loogu dhigo eexda qarsoon ee waaxda booliska iyo in kor loogu qaado dib u heshiisiinta jinsiyadaha.